


Ka-takhalusidda Alaabta Guriga ee Halista leh

Alaabta guriga qaarkood waa kuwo aad khatar u ah oo aanad ku tuuri karin qashinka ama ku shubi karin saxanka maydhista ama musqusha.



Waa inaad ku haysid meel amaan ah ilaa aad ka geyn kartid goob gaar ah oo loogu talagalay ka-takhalusidda.



Hooreyaasha baabuurka sida baatrootka, saliidaha baabuurka, iyo nadiifiyeyaal baabuur iyo guri oo badan ayaa halis leh.




Waxa kale oo halis leh alaabta beerta guriga sida dileyaasha haramaha ama dhirta aan anfaca lahayn ama cayayaanka, iyo kiimikooyinka loo isticmaalo barkadaha dabaasha.



Waxa kale oo halis leh rinjiga saliid ku saleysan, khafiifiyeyaasha rinjiga sida 'turpentine', iyo alaabta lagu dheeho jidka baabuurka iyo saqafka.



Degmaddaadu waxay leedahay goob ururin qashinka halista leh halkaasoo aad geyn kartid kiimikooyinka halista leh ee aad ka fogeynaysid gurigaaga. Goobta ururintu waxay furan tahay sannadka oo dhan, mana jiro kharash la iska qaado si loo qabto alaabta guriga ee halista leh. Ka eeg barta www.GreenGuardian.com saacadaha iyo maab leh goobta ay kaga taalo degmada.



Marka aad goobtaa geynaysid alaabta halista leh, si taxadir leh u habee si ay suurogal kuugu noqoto inaad si amaan leh u qaadid alaabta. Ha isku darin alaabooyinka. Xidhka weelka si aan wax u daadan. Haddii weelku uu sii daynayo waxa ku jiray ku dhex rid weel kale oo la xidhi karo.



Haddii alaabtu aanay ku jirin weelkii asalka ahaa, si cad ugu qor waxa ku jira.



Ku rid alaabta sanduuq gudahiisa lagu wareejiyay bac balaastig ah ka dibna sanduuqa saar baabuurkaaga. U hubso in aan sanduuqu dhaqaaqeynin ama aanuu is rogeynin.




Liisaankaaga baabuur-wadista u soo qaado aqoonsi ahaan. Marka aad timaadid goobta ururinta alaabta guriga ee halista leh, diyaar ka dhig liisaankaaga baabuur-wadista si aad u tustid farsamo-yaqaanka.



Ha cabin sigaar. Farsamo-yaqaan ayaa ku gargaari doona.



Waxa jira waxyaabo yaala gurigaaga oo aanad ku tuuri karin qashinka marka aad isticmaalka ka dhameysatid. Ma laha waxyaabahaasi qoraal taa sharaxaya. Tusaale ahaan, waa inaan qashinka lagu tuurin guluubyada nalka ee dheehooda guduhu iftiimo, baytariyada dib loo dabeyyo, qalabka guriga, qalabka sida telefshanka iyo kombiyuutarada, iyo taayirada.



Si looga takhaluso alaabta waa in la geeyo goob ururin, ama aad lacag bixisid si lagaaga qaado. Haddii aanad hubin sida looga takhaluso shay gurigaaga yaala, tag barta GreenGuardian.com si aad u heshid lambarka teleefonka degmadaada.

